Göteborgs Stad
Utbildning
Center för språkintroduktion

Qorshaha ka hor tagga takoorka iyo dhaqanka meel ka dhaca ee sanad-dugsiyeedka 15/16

Aragti

Ardayda oo dhami waa iney xaaladooda iskuul u arkaan mid leh amaano iyo ka qeyb qaadasho. Waa in ardayda loola dhaqmaa si isku mida oo ay ardayda kale iyo shaqaaluhu u qaabilaan si xushmad iyo qiimeyn ku jirto.

Go'aamada hadda iyo jiro iyo fahanka guud

Takoor waa marka iskuulku si aan caqli gal aheyn oo ardayda ka liidato loola dhaqmo arday iyadoo loo eegayo jinsiyad, aqoonsi jinsi ka gudbay ama tacbiir,qoomiyada ardayga darteed, diintiisa ama wax kaluu aaminsan yahay, naafadiisa darteed ama iyadoo loo eegayo cidduu u galmado ama da'diisa. Silcin waxa loola jeedaa hab dhaqan meel uga dhacayo qiimaha qof taasoo ay keentay iyadoo loo eegay waxyaabaha takoorka ee kor ku xusan. Hab dhaqan meel ka dhaca waxa loola jeedaa dhaqan iyadoo aanu ku xirneyn arimaha takoorka meel ka dhac loogu geysto qiimaha arday. Isku si ula dhaqanka waxa loola jeedaa in dhamaan ardayda oo dhan loola dhaqmo oo ay yeeshaan xuquuq iyo fursado isku mida. Balse loolama jeedo in mar kasta isku si loola dhaqmo.

Qiimeynta asaasiga ee iskuulku marka loo eego manhajka sameynayo haddana gudbinayo waa inaan meel looga dhici karin nafka bani'aadanka, xuriyadda shaqsiga iyo bad-baadada, qiimaha isku midka ah dadkoo dhan, sinaanta ragga iyo dumarka iyo gargaaridda dadka tabarta daran qatarta ku jira.

Sidee baanu gacan uga geysan karnaa in ardaydu hesho xuquuq iyo fursado isku mida?

¤ Manhajka iskuulka ee kooraska iswiidhishka afka labaad ah wuxuu ka kooban yahay erayo afka ah iyo waxyaabo ku saabsan qiimeynta dimuqraadiyadda.

¤ Mas'uuliyadda xagayaasha waa iney ardayda baraan qawaaniinta nidaamka iskuulka.

¤ Tarmiin kasta waxa ardayda, mas'uulada sharci ahaaneed ee ardayda iyo god meenada la siiyaa warbixin iyadoo la isticmaalayo turjubaan. Nidaamka iskuulka iyo qorshaha ka hor tagga takoorka iyo meel ka dhaca waxey ka mid yihiin warbixinta la bixiyo. Warbixintaa waxa haddana laga heleyaa bogga internetka ee iskuulka.

¤ Ardayda ayaa heleya waaya aragnimada dimuqraadiyadda waaqiciga marka la dhisayo gudigga fasalka iyo gudiga ardayda kaasoo kulmaya bishi mar. Laba arday ayaa ka qeyb qaadanaya gudiga cuntada ee wadajirka ee Lindholmen. Afar arday ayaa ka mida kooxda amaanada.

Center för språkintroduktion
Tankegången 4, Hus Atle
417 56 Göteborg
Tel exp 0738-00 01 41

¤ Dhowr howlo ah ee si wadajir loo sameynayo ayuu iskuulka oo dhami fulinayaa sanadka gudihiisa: maalinta dhaqanka, maalmaha ciyaaraha, daawasho filin iyo waxyaabo kale. Ardayda oo dhan ayaa heleya fursado isku mida ee toos uga qeyb qaadashada.

¤ Waxa ardayda oo dhan laga casuumayaa howlaha iyagoo fursad u heleyo tijaabinta howlaha kala duwan xiliga firaaqadda isla sameysanaya xiriir ka baxsan iskuulka. Taas ayaa noqon karta maqaayadda afka, caawinta leyliga guri iyo Move it. Howlahaa ayuu hogaamiyaha howlaha xiliga firaaqada iyo wakiilo ka socda gudiga ardaydu ay qiimeynayaan dhamaadka sanad-dugsiyeedka.

¤ Caawiyaha waxbarasho ee afka hooyo ayaa kor u qaadeysa amaanada ardayga, iyadoo ardaygu la kulmayo dad waaweyn ee iskuulka jooga kuwaasoo ku hadla isla wax ku sharxa afka hooyo ee ardayga. Tan ayaa iyaduna sii sahli doonto in ardaygu la qabsado isla markaana xoog uga qeyb qaato bulshada cusub ee iswiidhishka ah.

¤ Kooxo kala duwan oo leh heerar kala duwan ayaa la geynayaa dhismaha iyagoo isku dhexjira.

¤ Su'aalo weydiinta ardayga waxa daba socdo wareysi qoto dheer ee lala yeelanayo gudiga ardayda fasalada qalin-jabinaya dhamaadka tarmiinka.

Sidee baanu uga hortegi karnaa silcinta iyo hab dhaqanka meel ka dhaca?

¤ Shaqaale ayaa jooga goobaha banaan la wadaago xiliga birirta, iyadoo shaqaaluhu qado aqooneed la cunayo ardayda.

¤ Shaqaalaha caafimaadka ardayda ayaa isu soo bandhigayo dhamaan kooxaha cusub una sheegayo qaabka ay u caawin karaan, sida ayagoo isticmaalaya islaydshow iyo erayo caawiya ee dhowr af ah.

¤ Iskuulka ayaa bilaabay koox shaqo; amaano ardayda si ay u bartaan dhowr macalin iyo arday, iyadoo howlo la wada sameynayo, sida mowduuca todobaadka ee Caafimaadka.

¤ Kulanka konfaranska fasalka ee tarmiin kasta ayaa ah qaab cad ee loo muujinayo dhamaan ardayda iskuulka.

¤ Kooxda amaanada ayaa loo asaasayaa, si ay qeyb uga sii noqoto shaqada isku si ula dhaqanka. Waxey noqoneysaa koox kala duwan xirfad ahaan iyo dhowr wakiil arday iyo waliba ombuudka difaaca ardayda. Waxa la kulmayaa lab jeer tarmiinki.

¤ Waxaan soo saareynaa macluumaad (islaydshow) wadata warbixin sahlan ee fahanka guud ee kala duwan iyo kalmado macno dhan ee ku saabsan takoorka, silcinta iyo hab dhaqanka meel ka dhaca.

Center för språkintroduktion
Tankegången 4, Hus Atle
417 56 Göteborg
Tel exp 0738-00 01 41

Göteborgs Stad
Utbildning
Center för språkintroduktion

Sidee beynu u ogaanaa, wax uga qabanaa isla markaana u diiwaan gelinaa takoorka, silcinta, hab dhaqanka meel ka dhaca iyo xaaladaha la xiriira gacan ha hadalka?

¤ Foom su'aalo ay ka mid yihiin sida aad uga hesho iskuulka, amaanada iyo ka qeyb qaadashada ayaa lala yeelan doonaa dhamaan ardayda termiinka ugu danbeeya ee iskuulka. Ereyada furaha ee muhimka ah ayaa la isugu ururin doonaa liis iyadoo loo tarjumayo afaf kala duwan. Jawaabaha ayaa la ururinayaa iyadoo fasal kastaana, iyo gudiga ardaydu, la isla eegi doono jawaabaha lagana wada hadli doono. Maamulaha ayaa waliba arintan shaqaalaha kala hadli doono xiligia shirka shaqaalaha.

¤ Shaqaalaha arka ama helo signaal ku saabsan takoor, silcin, hab dhaqan meel ka dahca ama xaalado la xiriira gacan ka hadalka waa inuu mar kastaa ka dhiidhiiyaa oo toos ula xiriiraa EHT, isla markaan foomka loogu tala galay ku diiwaan geliyaa waxa dhacay. Foomka waa in dhaqso loogu geeyaa maamulaha, kaasoo isla markiiba bilaabaya baaritaan isaga iyo EHT. Wada hadalka lala yeelanayo ardayda kadib marka la arko meel ka dhac aad baa loo qiimeynayaa ujeedaduna waa horumarinta ardayda iyo ka baaran degidooda. Mar kastaa turjubaan ayaa la isticmaalayaa. Daba gal ayaa la sameeynayaa inta laga xukminayo in meel ka dhaco joogsaday. Haddii loo baahdo waxa la sameynayaa barnaamij talaabo qaadid.

¤ Xaaladaha gacan ka hadalka waxa loo yeerayaa shaqaale dhowr ah iyo boliis haddii loo baahdo. Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay inuu boliiska u yeero hadduu u arko iney lagama maarmaan tahay. Hadduu yimaado dhaawac shaqaale waxa loo yeerayaa ambalaas iyo/ama kalkaaliyaha caafimaad ee iskuulka. Shaqaalaha dhaawacu soo gaaray wuxuu warbixin u gudbinayaa hagaha ardayda arintu quseeyso, hogaanka iskuulka iyo EHT. Haddii EHT ay sidaa u aragto waxa la sameeynayaa kulan dhaqso dhacdada kadib oo lala yeelanayo kuwa ay taa quseyso. Mas'uulka caruurta waa in mar kastaa lagu wargeliyaa waana in go'aan laga gaaraa iney iskuulka sii joogaan kuwa arintu quseyso. Go'aan ku meel gaara ee ka joojinta iskuulka waxa sameynayo maamulaha arintaa darteed. Maamulaha ayaa go'aan ka gaaraya wixi go'aana ee talaaba qaadida isla markiiba ama ku meel gaarka ah. Dacwad boliiis ayuu sameynayaa dhibanaha ama maamulaha haddii arin weyni dhacdo. Maamulaha ayaa leh go'aanka iskuul ka joojinta ku meel gaarka ah ilaa iyo laba todobaad isagoo taana u gudbinayo madaxa. Arinta ayaa lagu baari karaa ayna ka hadli karaan gudiga waxbarashada si ay u gaaraan go'aan iskuul ka joojin ama nooc kale ee iskuuleed. Daba galka ayaa dhacaya laba todobaad gudahood kadib marka talaabada la qaado.

¤ Ardayda iyo mas'uulka caruurta ayaa kooxda caafimaadka ardayda uga dacwoon kara takoor, silcin iyo hab dhaqan meel ka dhac. Tan waxa lagu wargelin doonaa dhamaan ardayda iyo kulanka waalidka ee uu turjubaan jooga todobaadka 38, 2015 iyo janaayo 2016. Dacwad noocaan waxa loo daba geli doonaa isku sida aragti ama dacwo ka timid qof ka mida shaqaalaha.

¤ Foom diiwaan gelin ayaa ku lifaaqan qorshaha. Diiwaan gelinta waxa xafidayo maamulha isla markaana mas'uul ka uga ah EHT.

Center för språkintroduktion
Tankegången 4, Hus Atle
417 56 Göteborg
Tel exp 0738-00 01 41

Göteborgs Stad
Utbildning
Center för språkintroduktion

Meelaha ahmiyadda la saarayo sanad-dugsiyeedka 15/16

¤ Amaanada iyo nabadgelyada ayaa ah mowduuc guud ahaaneed sanad-dugsiyeedka.

¤ Koowj waxbarasho/arday caawiye ee afka ardayda ayaa la doonayaa, iyadoo iskuulkuna ka shaqeyn doono sidi lagu heli lahaa.

¤ Kooxda amaanada ayaa la asaasayaa koox kastee shaqo ka koobnaan doonto wakiilo macalimiin iyo arday ee EHT, adeeg arday iyo hogaanka iskuulka. Hogaamiyaha horumarka ayaa isugu yeeri doono.

¤ Waxa sii soconeysa shaqadi iyo casharadi galmada iyo iyo wada noolaashaha. Su'aalaha arintaa ku saabsan ayaa jirta xiliga wada hadalka ee wakiilada gudiga ardayda dhamaadka tarmiinka.

¤ "Siinta gabdhaha iyo wiilasha boos isku mida ee iskuulka". Su'aashan ku jirta su'aalo weydiinta ardayda joogto ayeynu uga shaqeyn doonaa, waana muhim marka loo eego qaabka iskuulku yahay oo ah 70% wiilal. Waxan fookaska saari doonaa boos helida fasalka dhexdiisa ee gabdhaha iyo wiilasha xiliga soo socda ee sawir bixinta macalimiinta.

¤ Shaqo qoto dheer ee gudiga fasalka iyo gudiga ardayda; qeyb muhima ee shaqada dimuqraadiyadda. Fasal kasta ayaa helaya shaqo hore iyo mid danbe ee kulamada gudiga ardayda, iyo sida howshan uu gudiga ardaydu ula socon doono.

Qiimeyn iyo daba gal

¤ Qorshaha waxa qiimenaya oo daba galaya koox leh xirfado kala duwa bisha agoosto 2016.

Center för språkintroduktion
Tankegången 4, Hus Atle
417 56 Göteborg
Tel exp 0738-00 01 41